Arjiga Warqadaha Cod Bixinta Maqanaha Minnesota

Dhameystir sadarada 1 ilaa 8. Fadlan si nadiif ah u daabac.

Soo celi arjigaan sida ugu dhaqsiyaha badan ee suurogalka ah. Warqadaha cod bixinta waa in la soo celiyo ugu dambeyn maalinta cod bixinta si loo tiriyo .

Muhiim: Ciidamada qalabka sida iyo cod bixiyeyaasha ku sugan dibadda waa in aysan isticmaalin arjigaan. Fiiri dhinaca kale si aad u heshid macluumaad badan.

1. sababta loogu baahan yahay warqadda cod bixinta maqanaha *(haddii aan la calameynin sabab, lama diri karo warqadda cod bixinta)*

- ☐ ka maqnaashada xaafadda
- ☐ cudur ama naafonimo
- ☐ xaq u yeelashada degdegga uu ku dhawaaqo taliyaha ama xareynta ay ku dhawaaqdo dawladda federaalka ama gobolka
- ☐ dishibiliinka diinta ama dhowrista fasaxa diinta
- ☐ shaqo sida garsooraha cod bixinta xaafad kale

2. warqadaha cod bixinta maqanaha loo codsado cod bixinta (cod bixinada) soo socda *(haddii aan la calameynin cod bixin, warqadda cod bixinta waxaa loo diri doonaa oo keliya cod bixinta xigta)*

- ☐ cod bixinta aasaasiga iyo tan guud labadaba
- ☐ aasaasiga oo keliya
- ☐ cod bixinta guud oo keliya
- ☐ aasaasiga khaaska ah (taariikhda) _____/_____/_____
- ☐ cod bixinta khaaska ah (taariikhda) _____/_____/_____

3. Magaca dambe ama magaca kore | Magaca kowaad | Magaca dhexe | Magaca la raaciyo

4. Taariikhda dhallashada _____/_____/_____ | Dagmada aad ku noshahay | Nambarka telefoonka _____ - _____ - _____

Emailka

5. calamadee dhamaan sanduuqyada quseeyo:

- ☐ Aniga waxaan haystaa shattiga MN ee baabuurta lago wado ama nambarka kaarka Aqoonsiga MN: _____
- ☐ Aniga waxaan haystaa Nambarka Soshal Sekuriti. Afarta nambar ee ugu dambeyso waa: XXX-XX-__ __ __ __
- ☐ Aniga ma haysti Shattiga MN ee baabuurta lagu wado, kaarka Aqoonsiga MN ama Nambarka Soshal Sekuritiga

Nambarkaada aqoonsiga waxaa la barbar dhigi doonaa nambarka ku yaal bakhshadda warqadda cod bixinta maqanaha

6. cinwaanka meesha aad ku nooshahay (guriga) | Abarmanka | Magaalada | **MN** | Zip code

7. qhov chaw nyob uas yuav xa koj tsab ntawv xaiv tsa mus rau | Abarmanka | Magaalada | Gobolka | Zip code

8. Aniga waxaan xaqiijinaa in:

- aan nafteyda u dhameystiraayo arjigaan;
- aan jiri doono ugu yaraan 18 sanno maalinta cod bixinta;
- aan ahay muwaadin Mareykan ah;
- aan daganaa Minnesota muddo 20 maalin ka hor maalinta cod bixinta;
- cinwaankeyga guriga yahay cinwaanka ku qoran foomka arjigaan;
- aanan hoos imaanin ilaalinta amar ka soo baxay maxkamadda oo iga reebeyso xaqa aan u leeyahay in aan cod bixiyo;
- maxkamadda aysan u arkin in aan sharci ahaan ahay qof itaal daran oo aan cod bixin karin;
- aan leeyahay xaqa cod bixinta maxaa yeelay, haddii leygu helay dambi culus, ciqaabteyda dambiga culus waa dhamaatay (la dhameystay) ama waxaa leyga sii daayay ciqaabteyda; iyo
- aan akhriyay oo aan fahamsanahay warkaan, in bixinta macluumaad been ah tahay dambi culus taaso lagu ciqaabi karo xabsi aan ka badneyn 5 sanno, ama ganaax aan ka badneyn $10,000, ama labadaba.

halkaan saxiix: X_____ taariikhda ___/___/___

Fiiri dhinaca kale si aad u aragtid tilmaamaha la siiyo codbixiyeyaasha itaalka daran ama awoodda qareenka

official use only (Isticmaalka rasmiga oo keliya)

Primary → ☐ reg ☐ non-reg	received date	ballot issued date	initials	type M C HCF	reason replaced ☐ rejected ☐ lost ☐ spoiled ☐ never received	repl. date:	precinct
General → ☐ reg ☐ non-reg	received date	ballot issued date	initials	type M C HCF	reason replaced ☐ rejected ☐ lost ☐ spoiled ☐ never received	repl. date:	school district

Sida ugu dhaqsiyaha badan ee suurogalka ah, arjigaan ku soo celi:

Meesha loo celiyo arjigaada:
Waa in aad ku celisid xafiiskaada cod bixinta deegaanka. Haddii aan kor lagu soo qorin, macluumaadka lagala xariiro sarkaalka degmadaada waxaa laga heli karaa meesha ku hoos taal "Liiska Cod Bixinta Rasmiga" kaasoo laga helo http://www.sos.state.mn.us.

Macluumaadka ku saabsan ciidamada qalabka sida iyo cod bixiyeyaasha ku sugan dibadda:
Haddii aad arji u qoraneysid warqadda cod bixinta maqanaha maxaa yeelay adiga ama qoyskaada ayaa ku jira ciidamada qalabka sida ama maxaa yeelay waxaad ku sugnaan doontaa dibadda iyo/ama waxaad dibadda ka joogi doontaa xuduuda dhulka Mareykanka, ha isticmaalin arjigaan. Waxaad xaq u leedahay badbaadinta khaaska ah haddii aad dalbatid oo aad adeegsatid Arjiga Kaarka Boostada Federaalka (Federal Postcard Application). Si aad u heshid macluumaad badan, tag https://minnesota.overseasvotefoundation.org

Fursadaha la siiyo arjiyada cod bixinta maqanaha soo noqda:
Arjiyada cod bixinta maqanaha waxaa lagu soo celin karaa boostada, faks ama email lagu soo lifaaqa skanka.

Marka la diri doono warqadaada cod bixinta:
Waxaa laguu soo diri doonaa alaabtaada cod bixinta maqanaha ugu yaraan 46 maalin ka hor inta aan la qabanin cod bixinta federaalka, gobolka, dagmada, magaalada ama xafiiska gudiga dugsiga ama cod bixin khaas ah oo loo qabto xafiiska federaalka ama dagmada iyo 30 maalin ka hor inta aan la qabanin cod bixin kale. Haddii aad arji qoratay taariikhdaan kaddib, waxaa la diri doonaa warqadaada cod bixinta marka la helo arjiga. La xariir sarkaalka cod bixinta dagmadaada haddii aadan helin warqadaada cod bixinta.

Yaa dalban kara warqadda cod bixinta:
Qof kasta waa in uu naftiisa u dalbado. Waa dambi culus in war been ah lagu qoro arjiga warqadda cod bixinta maqanaha, in leysku dayo in lagu codeeyo warqad sharci darro ah, ama in qof kale lagu kaalmeeyo in uu ku cod bixiyo warqad sharci darro ah.

Haddii ay kula tahay in aadan ku jirin diiwaanka si aad u cod bixisid:
Haddii aadan ku jirin diiwaanka cinwaanka guriga sharciga ku ah, waxaa laguu soo diri doonaa arjiga diiwaan gelinta cod bixiyaha iyo alaabtaada warqadda cod bixinta .

Warar ku saabsan isticmaalka macluumaadka gaarka ah:
Ogeeysiis gaar ah oo la xariira xogta adiga lagaa codsaday in aad keentid kuna saabsan arjiga warqadda cod bixinta maqanaha ayaa ku jirta bogga internetka http://www.sos.state.mn.us/index.aspx?page=211.

Fursadaha kuu furan haddii aad qabtid itaal dari:
Waxaad:

- naftaada saxiixi karta arjiga,
- ku sameeyn kartaa calamadaada, ama
- qof kale weydiin kartaa in uu kuu saxiixo adiga oo jooga (sido kale qofkana waa in magaciisa ku saxiixo).
- Haddii aad dhaqan u leedahay in aad saxiixa shabadda u adeegsatid dhamaan ujeedooyinkaada saxiixa, waxaad isticmaali kartaa shabaddaada saxiixa ama waxaad qof kale weydiin kartaa in uu isticmaalo shabadda saxiixaada adiga oo jooga. Fiiri *Sharciyada Minnesota*, qeybta 645.4, qeybta hoose 14.

Macluumaadka ku saabsan Awoodda Qareenka:
Cod bixinta kuma jirto awoodda qareenka. Awoodda qareenka waxay la xariirtaa oo keliya arrimaha saameyo hantida. Qofka qaba awoodda qareenka wuxuu kuu saxiixi karaa oo keliya marka aad la joogitid, sida ku qoran kor. Fiiri *Sharciyada Minnesota*, qeybta 523.24, qeybta hoose 14.